


---

## **Pacemaker Placement: Epicardial**

Beddelaadda Gaabiska Garaacis-hagaajiyaha



Ogeysiis:

---

The Children's Heart Clinic, 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404  
612-813-8800 \* Toll Free: 1-800-938-0301 \* Fax: 612-813-8825  
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404

---

## **Wadnaha Agtiisa Garaacis-hagaajiyaha** Epicardial Pacemaker Placement

Garaacis-hagaajiyaha wadnaha waa qalab macmal ah oo si toos ah loogu dhejiyo wadnaha oo lagu xakameeyo garaaca wadnaha ee ah degdegta ama gaabiska. Garaacis-hagaajiyaha waxaa la geliyaa ilmaha loo arko in uu gaabinayo garaaca wadnahooda (wadnegaabis) ama marka aysan korantada qalbaca sare ee wadnaha (qalbaca) la xiriirin qalbacyada hoose ee wadnaha (qalbacyada), oo waxaa la yiraahdaa xannibaadda wadnaha. Bukaanka wuu ku dhalan karaa wadne xanniban ama wuxuu ku dhici karaa intuu socdo qalliinka. Garaacis-hagaajiyaha waxaa la geliyaa meel ka baxsan wadnaha (bannaanka wadnaha) marka bukaanku aad u yar yahay oo qalab ayaa la sii geliyaa gudaha wadnaha (hab ah dabamarista xididka) ama ilmaha uu ka xun yahay hal qalbac, sida ka dib qalliinka fudud ee Fontan. Garaacis-hagaajiyaha wuxuu ka kooban yahay xargaha qalbacyada sare iyo/ama hoose iyo koronto-dhaliye (ama batari).

Waa wax ku xiran qorshaha qalliinka, bartamaha xabadka (jeexitaan ah bartanka xabadka) ama duleelin ah qeyb ahaan (jeexitaanka qeybta hoose ee xabadka) ayaa la sameeyaa jeexista ka hor, haddii loo baahdo. Sida ay tahay, xargaha batariga waxaa lagu tolaa qalbac kore (qeyba sare ee wadnaha), qalbaca hoose (qeybta hoose ee wadnaha), ama labadaba. Xargaha waxay isugu dheganaan karaan mid ah hal-hal ama mid ah laba-laba. Ka dib marka xargahan la hubsado oo la tijaabiyo, si loo hubiyo in ay la socdaan oo ay dareemaan garaaca wadnaha ee ugu habboon, waxay ku jiraan maqaarka hoostiisa ilaa uurkujirta sare. Dabadeedna, jeexitaan gaar ah ayaa la sameeyaa si loo diyaariyo “jeeb” ah meel hayn doonta koronto-dhaliye (batariga). Cirifyada xargaha waxaa lagu dhejinayaa oo lagu hubsanayaa koronto-dhaliyaha, oo markaasna lagu dhejiyo meel u ah uurkujirta oo ah “jeeb”. Labada jeexitaan waa la xirayaa.

### **Hawlgalka Caadiga ah ee Qalliinka Ka-dib:**

- Wakhtiguu Qaadanayo Qalliinka: 3 saac
- Qalabka Tuubooyinka: Mararka qaarkood, bukaanku waxaa lagu soo celinayaa Xarunta Daryeelka Wadnaha ka dib qalliinka oo waxaa lagu xirayaa tuubo ah neefsashada, mid halbowle oo lagula soconayo cadaadiska dhiigga, mid kale oo ah xididdada (mid ah faleebbe daawada ama IV daawada laga qaato iyo in dhiig laga qaado), faleebbe ama IV bannaanka ah, tuubooyinka xabadka ah oo dheecanka looga daadinayo, iyo kateetaraha Foley oo ah kan kaadidu geleyso.
- Sookabashada Caadiga ah Qalliinka Ka-dib: Bukaanka qaar badan ayaa laga soo saaraa tuubada neefsashada intay ku jiraan qolka qalliinka ama wax yar qalliinka ka dib. Tuubada halbowlaha, haddii ay jirto, badanaa waa laga saaraa maalmo ka dib, marka laga joojiyo daawada laga siinayo faleebbaha ama IV. Tuubada xididdada bartamaha waxaa laga bixinayaa marka laga joojiyo daawada ee aan looga baahneyn dhiig in laga qaado, Tuubooyinka xabadka waxaa laga saaraa 24 saac ka dib qalliinka, markuu yaraado dheecaanka soo baxaya.
- Muddada Seexinta Isbitaalka: Bukaanku wuxuu isbitaalka joogayaa badanaa 4 maalmood ka dib marka loo geliyo garaacis-hagaajiyaha wadnaha.

**Qaadashada Daawooyinka Guriga:** Carruurta waxa ay u baahan karaan hal daawo ama in ka badan in ay guriga u qaataan ka dib marka loo geliyo garaacis-hagaajiyaha wadnaha sida:

- Daawada biyaha saarta (Lasix) si looga xakameeyo dareeraha